


Badbaadi tamarta guriga

Cabbiraya, adkaynaya, daminaya oo xiraya



Talooyin ku saabsan isticmaalka
ogaansaha tamarta

Korontada iyo tamarta kale

Guriga dhexdiisa waxa tamarta loo isticmaalaa kuleylinta guriga, biyaha kulul, korontada guriga iyo qaboojinta hawada.

- Tamarta waxaynu ka heli karnaa korontada, saliida, rugta dhexe ee kulaylka soo gudbisa (fjärrvärme), xaabada, matoorada wax kululeeya, iwm.

Xusuusnow inaad firiso isticmaalka tamartaada/korontadaada marmarka qaarkood. Tuugada tamarta way fududahay in la helo haddii aad garanayso meesha aad ka raadinayso! Buuggan yar waxaa ku jira talooyin wanaagsan oo badan.

Korontada qalabka elektarooniga ah

Tamarta korontada ee aan loo isticmaalin kululaynta, qaboojinta iyo biyaha kulul waxaa loo yaqaan korontada hawsha guriga waxaana loo isticmaalaa:

- Iftiiminka, tv-yada, kombuyuutarada, qalabka elektarooniga guriga, talaajadaha/firinjeerada, qaboojiyeyaasha, mashiinka dharka- iyo mishiinka weelka iyo waxyaabo kale.

Haddii aad doorato qalab elektarooniga ah oo korontada badbaadiya waxaad yarayn kartaa isticmaalka tamartaada. Caadayso inaad hubiso summada/calaamada tamarta, inta aanad shay cusub iibsas ka hor.

Goorma ayaad bilowdaa inaad daarto mishiinka weelka dhaqa?

Korontadu waa inay ku filnaato wax badan oo bulshadeena ka mid ah. Haddii dad badani ay rabaan inay isticmaalaan koronto badan hal wakhti oo isku mid ah, koronto yaraan ayaa dhici karta - koronto yaraan muddo gaaban ah. Ma ogtahay in korontadu ay tahay in la soo saaro isla marka la isticmaalo? Marka aad tamar kaydato oo aad baabuurka jaajgaraysato ama aad aad daarto mishiinka dharka markay baahidu yar tahay, waxaad ka qayb qaadanaysaa faa'iidooyinka bulsho ee muhiimka ah ee yaraynaya khatarta koronto yaraanta.

Haddii aad doorato qalab elektaroonig ah oo kaydida tamar iyo nalal leh (waat/quwad hoose), waxaa kuu dhigmaysa lacag. Xusuusnow inaad had iyo jeer firiso calaamada tamarta.

Korontada heeganka ah - waa wax aan loo baahnayn (standby)

Heeganka macnihiisu waa xaalad sugitaan, ama "had iyo jeer diyaar ah". Marka uu tv-gu heeganka ku jiro (standby) waxa uu isticmaalaa koronto xiitaa haddii aanad firsanayn, waxa sidoo kale la mid ah kumbiyutarka, raadiyaha iwm.

Raadso habab adiga kugu habboon si aad meesha uga saarto korontada heeganka ah (standby-el). Qaybiyaha korontada ee leh furaha korontada laga daaro/damiyo wuxuu noqon karaa hal hab.


Koronto badan oo aan loo baahnayn

Nalalka ka daaran qolalka aan cidid joogin, qalabka kala beddela quwada korontada (transformatorer) iyo jaarjarada (laddare) ku jira godka korontada habeen iyo maalin waxay isticmaalayaan koronto aan loo baahnayn.

Haddii shay kululaado - wuxuu isticmaalayaa koronto! Jaarjarada (laddare) noocyada kala duwan iyo qalabka kala beddela quwada korontada (transformatorer) ee nalalka loogu talagalay - haddii ay kululaadaan, ka soo saar fiilada korontada!

Sidee ayaad u isticmaashaa tamar-taada?

Sidan ayuu u eg yahay gurigaagu adiga, isticmaalka korontada ee aad adigu saamayn ku yeelan kartaa way kala duwan tahay haddii aad tusaale ahaan deggan tahay guri bangalo ah (villa) ama guri dabaq ah (lägenhet). Qayb ka mid ah kaydka gurigu wuxuu faa'iido u yeelan doona boorsadaada lacagta, halka kaydka aad samayso dhammaantii uu wax weyn ka bedbeli doono guud ahaan - waxaynu u baahanahay in aynu is caawino!



Korontada heeganka ah - waa wax aan loo baahnayn

Iyada oo aan loo eegayn haddii aad deggan tahay guri kiro ah, guri bangalo ah, qalcad/qasri ama cariish, waxaad badbaadin kartaa korontada si aad u ogaato hab dhaqankaaga. Ma ogtahay halka ay joogaan tuugada tamarta ama waxaad samayn lahayd si aad u badbaadiso tamarta? Samee tijaabada oo fiiri sidaan tahay.

Hadaad si wanaagsan ula socoto, waxaad noqonaysaa qof ka og isticmaalka tamarta kadibna adiga ayaa go'aaminaya inta ay noqonayso lacagta aad rabto in aad ku isticmaasho korontada iyo tamarta kale! Waxa-anu rajaynaynaa inaad ka hesho talooyin badan oo wanaagsan oo ku jira buuggan yar! Nasiib wanaagsan!

1 Annagu waanu la soconaa

- A** Waanu ognahay inta koronto ee aanu isticmaalno
- B** Waanu ognahay inta ay leeg tahay tamarta kale ee aanu u isticmaalno - kulayka rugta dhexe soo gudbiso (fjärrvärme), xashiishka la shito ee alwaaxda ka soo hara (pellets)
- C** Waanu ognahay annagu sida ay isticmaalka korontadayadu u saamayso cimilada iyo sistamka korontada

Kululayn

- A** Qolkayaga jifku ugu badnaan waa 16-18 °C
- B** Qolalkayaga kale ugu badnaan waa 18-20 °C
- C** Waanu adkaynaa albaabbada, dariishadaha, bisadaha- iyo meelaha sare ee saqafyada ku yaala inta ka horaysa xilliga jiilaalka
- D** Waxaanu guriga alaabta u dhignaa si kulaylku u wareego
- E** Wakhti gaaban oo wax ku ool leh ayaanu hawada guriga ugu furnaa
- F** Xilliga xagaaga waxaanu leenahay wax qorxda naga celiya oo waxtar leh markaa uma baahnin qobooyiye AC

Biyaha kulul

- A** Waxaanu qobaysanaa wakhtiyo gaaban
- B** Waxaa noogu rakiban qasabado iyo madaxyada tuumbooyinka lagu qobaysto oo
- C** Waanu iska ilaalinnaa biyaha soconaya marka aanu weelka dhaqayno iyo marka aanu cadayanayno
- D** Ma lihin qasabado dareeraya ama biyaha liigaya/daadinaya

Korontada guriga

- A** Annaga gurigayaga ma jiraan wax xaalad heegan ah iska ahi
- B** Waanu ka saarnaa jaarjarada (laddare) aan la isticmaalayn
- C** Waxaanu daarnaa mishiinka weelka- iyo kan dharka lagu dhaqo markay buuxsamaan
- D** Waxaanu isticmaalnaa barnaamijyada eco
- E** Dharka waxaanu ku qallajinaa hawada inta badan haddii ay suurto gal tahay
- F** Waanu la soconaa heerkulka talaajadda/firinjeerka iyo qabooyiyaha oo cuntada barafka noqotay waxaanu barafka kaga dhalaalinnaa tallaajadda/firinjeerka

Waxtarid

- A** Waxaanu xakamaynaa baabuurka korontada ku shaqeeya, isku-dhafka ah/koronto iyo baansiin ilaa bartamaha maalinta ama habeenka
- B** Waxaanu kala qaybinnaa waxyaabaha u baahan korontada maalintii - ma samayno isku mar cunto karinta, mishiinka weelka dhaqa, qalajiyaha dharka, meesha dadku isku kuleeeyo (baster) iyo dubida rootiga.
- C** Waxaanu xakamaynaa wakhti dhammaan qalabka korontada ku shaqeeya si aanay u bilaaban inay shaqeeyaan markay saacadu tahay 17-19 maalmaha qabowga inta lagu jiro bilaha jiilaalka.
- D** Waxaanu ku xakamaynaa kuleyliyaha korontada ilaa bartamaha maalintii iyo habeenkii oo wuxuu faa'iido weyn u leeyahay sistamka korontada.

Had iyo Jeer
Dhif iyo naadir
Marnaba



La socodka tamarta

Ma shaynayaa barnaamijyada- eco runtii?

Mishiinka dharka lagu dhaqo ama mishiinka weelka lagu dhaqo, kuleylinta biyaha ayaa "qiimaha" ugu badan ee tamarta ay ku baxdaa, ee ma aha tamarta loo isticmaalo si loogu sameeyo markuu "motoorku wareejinayo dharka" waxaa la oran karaa waa wakhtiga mishiinku shaqaynayo. Sida uu weelka ama dharku ay u wasakh badan yihiin ayaa go'aaminaysa muddada iyo inta biyo kulul loo baahan yahay si loo helo natiijo wanaagsan "weel/dhar nadiifka ah"

Barnaamijyada kala duwan ee wax dhaqa waxa loo qaabeeyey si had iyo jeer loo helo natiijo isku mid ah, waxa la oran karaa "weel iyo dhar dhaqid nadiif ah". Waxaa lagu qiyaasay in 1.4 kWh looga baahan yahay in lagu dhaqo 4 kg oo dhar ah 60 digrii iyo 0.6 kWh haddii aad ku dhaqayso 40 digrii. Haddii aad doorato heerkul hoose, mashiinka ayaa buuxinaya oo isticmaalaya barnaamijka eco, waxaad markaa badbaadinaysaa koronto badan.

Qoyska caadiga ah celceliska isticmaalka tamarta dhaqida dharka waxa lagu qiyaasaa 200-300 kWh/sannadkii

Caadooyinka iyo dhaqanka

Ma jiraan wax sax ama khalad ahi - qof kastaa wuxuu leeyahay baahiyo kala duwan

Isticmaalka tamarta/korontadu isku mid uma aha guryaha kala duwan iyo qoysaska kala duwan. Haddii tusaale ahaan. dadka da'da ah ama dadka buka laga yaabo inay u baah yihiin inuu guduho kuleyl ahaado - taasi waa okeyy. Waxa muhiimka ahi waa inaad noqoto qof ku firfircoon isticmaala tamarta halkii aad ka noqon lahayn qof caajis ah.

Taas oo ah: inaad ogaato inta tamar ee aad isticmaasho iyo waxa aad u isticmaasho. Haddii aad markaas kadib rabto inaad kaydiso tamarta, waad garanaysaa meesha tuugada tamartaadu ay joogaan! Buuggan yar wuxuu ku siinayaa talooyin ku saabsan halka aad ka bilaabi lahayd raadintooda!

Beddel farsamooyinka ama caadooyinka

Xusuusnow inaad had iyo jeer meesha ka saarto dhammaan isticmaalka tamarta aan loo baahnayn inta aanad soo iibsana qalab cusub ka hor ama, tusaale ahaan, sistam kuleyl ah oo cusub. Isticmaal talooyinka ku jira buuggan yar oo maalgasho aqoonta cusub inta aanad maalgashan farsamooyinka cusub ka hor.

Ilaali qalabkaaga

Waxyaalaha qaar ayaa had iyo jeer daaran oo koronto ayey isticmaalaan, sida firinjeerka/talaagada iyo qaboojiyaha. Waxay isticmaali karaan wax badan ama wax yar iyadoo ay ku xiran tahay hadba sida aad u daryeesho iyo sida isticmaalka tamartoodu u fican tahay.

Guryaha Carlos iyo Maria

Waxaa jira qalab elektaroonig ah ama qalab wax lagu cabbiro oo kala duwan oo aad ku ogolaanayso si aad ula socoto isticmaalka korontadaada wakhtiga dhabta ah ama aad aragto sida isticmaalka korontadu uu noqonayo inta lagu jiro maalintii. Adigoo adeegsanaya qalabkan waxaad arki kartaa inta ay badeecad/alaab gaar ahi ay isticmaalayso waxaanad ka helaya faham guud isticmaalka tamartaada.

Waxaynu isticmaalnaa tamar kala duwan

Maria iyo Carlos waa daris, waxay deggan yihiin guryo isku mid ah, waxay leeyihiin sistam kuleyl oo isku mid ah oo si toos ah ugu shaqeeya matoorada soo nuuga hawada kulul laakiin uma isticmaalaan tamar si isku mid ah. Waxay ku kala duwan yihiin waa: hab-dhaqankooda, qalabyada elektarooniga ah (tusaale inay leeyihiin korontada heeganka ah/stadby ama aanay lahayn), daaqadaha, albaabada (wax soo daynaya, hawo u furida guriga oo sax ah), sida ay u isticmaalaan kulaylka iyo biyaha kulul, inta qof ee guriga deggan. .

Qoyska Maria, laba qof oo waaweyn iyo laba carruur ah

Qoyska Maria aad ugama fikiraan isticmaalka tamartooda. Waxay jecel yihiin inuu guriga gudhiisu diirimaad noqdo. Qoysku waxay jecel yihiin inay qubaystaan wakhti dheer maalin kasta. Inta badan waxay iloobaan inay damiyaan nalka markay meesha ka baxaan . Markay guriga yimaadaan, waxay daaraan tv-ga iyo kumbuyuutarrada, iyaga oo aan u eegin inay cidii isticmaalayso iyo in kale. Habeenkii iyo maalintii, tv:ga iyo waxyaabaha kale korontadoodu waa heegan (standby)



Baahida sannadlaha: way ka badan tahay 20,000 kWh/sannadkii

Qoyska Carlos, laba qof oo waaweyn iyo laba carruur ah

Carlos wuu ogyahay isticmaalka tamartiisa. Wuxuu u beddeley nalalka LED-ka ah oo wuxuuna doortay qalab elektaroonig ah oo tamarta kaydiya. Wuxuu la socdaa kulaylka gudaha guriga sida uu yahay iyo heerkulka firinjeerka/talaagada iyo qaboojiyaha. Qoysku waxay qaataan qobaysyo wakhtiyo gaagaaban ah, mishiinka weelka- iyo kan dharka waxay daaraan markay buuxaan oo keliya. Dharka hawada ayey ku qallajiyaa.




Baahida sannadlaha: qiyaastii 11,000 kWh/sannadkii

Isticmaalka aasaasiga = aasaaska jaantusku waa waxa had iyo jeer daaran: qaboojiyaha, firinjeerka, qalabka wax diiriya (element), kuleylka dhulka, raadiyaha saacadda leh, iwm. Isticmaalka aasaaska ee badan waxaa sabab u ah koronto heegan ah (standby) ama nalalka daaran ee aan loo baahnayn. Isticmaalka ku meelgaarka ah waxa lagu muujiyay sida "ugu saraysa". Way sii badanayaan oo kor ayey ku sii kacayaan qalabku sida tv-ga, kumbuyuutarka, shoolada sare ee dabka (spis), feerada/kaawiyada aad adigu daartay ama haddii aad daartay nalal intaa ka badan adigu.

Caadooyinka kala duwan maalintii - saacadba saacada kale

Si loogu kululeeyo guriga oo dhan ilaa 23 °C, waxa loo baahan yahay tamar badan habeen iyo maalimba.



Daarida foornada hoose wakhti dheer inta aan cuntada la gelin ka hor, ku karinta baradhada/ bataatiska dabool la'aan.


Dhammaantood way seexdeen Istimcaalkii aasaasku wuu shaqaynayaa.

Reerkii way tooseen! Meelaha ugu sareeya ayey gaaraan marka qoysku qobaysanayo oo ay quraacda samayaan.

Dhammaantood waxay aadaa shaqooyinka iyo dugsiyada. Istimcaalkii aasaasku wuu shaqaynayaa.

Dhammaantood waxay yimaadaa guriga. Meelaha ugu saraysa ayey gaartaa marka cashada la karinayo, mishiinka weelka la daaro. Kumbiyuutarada, tv-yada iyo waxyaabaha kale ee maaweelooyinka leh la daaraa.

Ciir iyo ismaris/saanwaj isla socda oo uu la socdo joornaalka subaxii soo baxa



Dhammaantood way seexdeen Istimcaalkii aasaasku wuu shaqaynayaa.

Reerkii way tooseen! Meelaha ugu sareeya ayey gaaraan marka qoysku qobaysanayo oo ay quraacda samayaan.

Dhammaantood waxay aadaa shaqooyinka iyo dugsiyada. Istimcaalkii aasaasku wuu shaqaynayaa.

Dhammaantood waxay yimaadaa guriga. Meelaha ugu saraysa ayey gaartaa marka cashada la karinayo, mishiinka weelka la daaro. Kumbiyuutarada, tv-yada iyo waxyaabaha kale ee maaweelooyinka leh la daaraa.

IFTIINKA

Nalalka demi markaad meesha ka baxayso

- Xir oo dami marka aad qolka ka baxado.
- Isticmaal nalalka LED-ka ah, waxay isticmaalan afar ilaa shan jeer korontov wax ka yar tan ay isticmaalaan nalalka halogen.

MARAWAXADA JIKADA

Kaydi kulaylka

- Cuntada ka sokow, marawaxadu waxay kulaylka ka saaraysaa gurigaaga, gaar ahaan marka uu bannaanku qabow yahay.
- Si xikmad leh u isticmaal marawaxada oo nadiifi marar badan.

SHOOLADA DABKA SARE (SPIS)

Cuntada u karso si tamar/koronto dhaqaalayn leh

- Isticmaal daboolka - waa waxaan shaki ku jirin in si fudud loo iloowo. Waxaad kaydinaysaa 30% tamar ah markaad daboolka saarto.
- Haddii aanad haysan makiinad/shoolad (inductions-spis) - iskuday inaad isticmaasho kulaylka ku hara - dami/xir inta aanay cuntadu diyaar noqon ka hor!

FOORNADA

U karso cuntada si tamar wax ku ool ah leh!

- Isticmaal kulaylka ku hara - dami/bakhtii wax yar ka hor inta aanay cuntadu diyaar noqon.
- Fur albaabka markaad u baahan tahay oo keliya - Mar kasta oo aad furto heerkulka ayaa hoos u dhacaya 25-50 °C.

Wax badan ayaaad kaydinaysaa!

1 Ku bilaabaya qabow

- Miyaad jeclaan lahayd biyo daarta? U wareeji qasabada dhinaca biyaha qabow, markaa waxaad ka taxadaraysaa inaad tuubooyinka ka buuxiso biyo kulul iyada oo aan loo baahnayn!

2 Miyaad lacag ku shubi lahayd tuumbada biya wasakhda maraan/bullaacadda?

- Haddii aad weel ku maydho biyo kulul oo soconaya, lacagtaada ayaad toos ugu shubaysaa bullaacadda.
- Isticmaal weel godan ama mishiinka weelka dhaqal!

3 Cabbirku/inta uu leeg yahay macno weyn ayuu sameeyaa

- Haddii shoolada dabku (spis-plattan) ay ka weyn tahay 1 cm dheriga, isticmaalka tamarta ayaa kordhaysa 20%.


4 Shay/weel siman ayaa ugu fican

- Isticmaal dheryaha iyo daaway-aasha salkoodu ay siman yihiin oo keliya. Haddii dheriga salkiisu aanu sinayn 0.5 mm isticmaalka tamarta ayaa kordhaysa 25%.

MAKIINADDA CUNTADA LAGU DIIRIYO

Waxyaabo yar yar oo macaan

- Haddii aad rabto in aad kululaysato cunto yar makiinadda cuntada lagu diiriyo ayaa wanaagsan.



FIRINJEERKA/TALLAAGADDA

Ilaali firinjeerka/tallaagadda

- Ha oggolaanin inuu qabowgu ka baxo firinjeerka/ tallaagada, iska hubi in liisaska (listerna) firinjeerku ay adag yihiin oo albaabka ha furan haddii aan loo baahnayn.
- Dib u soo cesho qabowga
 - ku dhalaali cuntada barafowday firinjeerka/ tallaagadda.
- Cunto kulul ha gelin firinjeerka/tallaagaadda.
- Heerkulka saxda ah, +5 °C, intaa ayaa ku haboon.

QABOOJIYAHA

Ilaali firinjeerka/tallaagadda

- Ka dhalaali barafka marmarka qaarkood, ka faa'iidayso fursadda aad kaga dhalaalin karto xilliga dayrta, markaa waxaad cuntada ku kaydin kartaa bannaanka inta aad barafka ka dhalaalinaysa.
- Nadiifi gadaasha dambe - boodhka xagga dambe ka saaran wuxuu kor u qaadayaa isticmaalka tamarta.
- Wakhti gaaban oo keliya ha furnaato
- Heerkulka saxda ah, -18 °C, intaa ayaa ku haboon.

MISHIINKA WEELKA DHAQA

Halyey tamar badbaadiye dhab ah

- Isticmaal barnaamij sax ah, gaar ahaan barnaamijka-eco.
- Ka saar shaqada qaybta qallajinta haddii ay suurtagal tahay.
- Daar marka uu mishiinku buuxo oo keliya.
- Ka xoq saxanka cuntada si nadiif ah halkii aad biyo ku dhaqdhaqi lahayd.

5 Wax kasta oo dhexdhexaad ah ayaa ugu fican

- Haddii aad karinaysa biyo shaah ama aad kululaynaysa biyo, isticmaal biyo kululeeyahay (vattenkokare). Ha buuxin wax ka badan intaad u baahan tahay.

6 Wakhtigii lagu celin lahaa mar kale?

- Ku shub kafeega tarmuuska wuxuu noqon doonaa mid diiran ilaa laga gaadhayo wakhtiga lagu ceshan lahaa mar kale!

7 Doolshe/keeg foornada ku jira?

- Haddii aad wax dubtay, way ku haboon tahay inaad cunto ku kariso foornada inta ay weli kulu-shahay.

8 Si adag ma u xirtay?

- Hubi in xarigga daboolku uu si adag ugu dhegsan yahay adiga oo gelinaya warqad u dhaxaysa albaabka iyo qaboojiyaha. Haddii warqaddu aanay ku dhegin marka albaabku xiran yahay waxay u badan tahay inuu qabowgu halkaa ka geleyo. Ama toosh daaran geli qaboojiyaha (frysen) - marka uu qolku mugdi noqdo, waxa markaa la arkayaa meesha daloosha.

Musqusha lagu qobaysto

BIYAHA KULUL

Roobku qiimihiisu waa dahab

- Qubayska gaaban ee shanta daqiiqo ah halkii uu ka ahaan lahaa rubuc saac wuxuu yarayn karaa baahida biyaha kulul ee sanadlaha ah ilaa 500 kWh
- Isticmaal saacad aad wakhtiga qubaysaka kala socoto si aad u ogaato inta aad qubaysanaysay.

IFTIINKA


Gacan caawimo

- Saacada korontada joojisa (timers), sensuurada dhaqdhaqaaqa iyo alaada gudbisa iftiinka ayaa dhamaantood kaa caawin kara inaad tamarta kaydiso - isticmaal iftiinka markaad u baahan tahay oo keliya.

MEESHA SHUKUMAANADA/ TUWAALADA LAGU QALLAJIYO EE MUSQUSHA KU TAALA

Dareen diiran

- Xusuusnow inaad damiso meesha korontada leh ee shukumaanada lagu qallajiyo marka shukumaanadu/tuwaaladu qallalaan. Haddii uu daaran yahay sanadka oo dhan, wuxuu isticmaali kartaa ilaa 600 kWh.



KULAYLIYAHA DHULKA

Cago qaboowi ma jiraan

- U ogolow inuu kulaylku si furan u wareegeo, fadlan iska ilaaliya roogagga iyo alaabada badan ee taala dhulka kuleylka hoose ka soo baxayo.
- Ha iloobin inaad gebi ahaanba damiso marka aan loo baahnayn!

Wax badan badbaadi!

1 maalin timuhu xun yihiin

- Mishiinada timaha qalajiya, timo toosiya, timaha laalaaba, timaha qalqaloociya - mararka qaarkood waxba ma caawinayaan. Hore ha u sii bilaabin oo iska hubi inaad damiso markaad dhammayso.

2 Meelaha jirka lagu xannaaneeyo ee guriga ka mid ah

- Barkada yar ee biyaha diiran leh ee jirka lagu duugo, qolka kulaylka, meesha aan dabiiciga ahayn ee jirka lagu diiriyo Wanaagsan, wanaagsan ... haddii aad doonayso inaad soo iibsato qaar cusub, ka fikir inaad fiiriso waxtarka tamartooda.

3 Caddayanaya, caddayanaya ilkaha

- Fadlan isticmaal biyo qabow.
- Xir biyaha marka aad caddaynayanayso.
- Ka saar filada caddayga korontada marka uu buuxsamo.

4 Si adag ma u xirtay?


- Haddii ay qasabada biyo kululi ka soo liigayaan, tusaale. burqad yar oo daciif ah, si aan loo baahnayn ayaad biyo kulul ugu shubaysaa dhuunta biyaha wasakhda ee bulaacada in ka badan 16 000 kr sannad walba.

QALLAJIYE

Run ahaantii cimilada u wanaagsan

- Dharka oo hawada lagu qalajoyo ayaa had iyo jeer ah tamarta ugu waxtarka badan!
- Qalabka wax lagu qalajiyo ee korontada ayaa isticmaali kara tamar aad uga badan tan mashiinka dharku isticmaalo.

Qolka ama meesha ay xaafadu dharka ku dhaqato



ARMAAJADA DHAR- KA LAGU QALLAJIYO

Farsamo qadiimi ah

- Armaajooyinka dharka lagu qallajiyo ee aan lahayn farsamooyinka kuleylka soo nuuga ee wax kulleeya, waxay maanta isticmaali karaan koronto aad u badan sidii ay ahaan jirtay 30 sano ka hor - tuug tamareed weyn!

HAWO KU QALLAJINTA


Barafka qallalan

- Hawo ku qallajinta ayaa noqon karta hab fiican oo lagu qallajiyo dharka. Laakiin ... si sax ah u hagaaji si uu u istaago markuu dharku qallalo ama isticmaal saacad wakhtiga sheegta (timer).

MISHIINKA DHAQRKA DHAQA

Daar oo shid markay buuxdo oo keliya

- Qasaaladaha dharku markay buuxaan waxay baadiyaan tamarta - qasaaladaha qaarkood waxay iskood u dooran karaan barnaamijka ay dharka ku dhaqayaan iyadoo eegayo dharka ay dhaqayaan intuu leegyahay.
- Wareejin dheeraad ah oo ay samayso haanta dharka qallaiisa si fudud ayey dharka u qallajinaysaa.



MAKIINADDA DHARKA QALLAJISA EE WAREEJISA

Makuu kala dhar buuxo ayuu ugu fiican yahay

- Way fududahay in laga buuxiyo qalajiyaha dhar aad u badan, ka dibna tamar badan ayuu u baahan yahay si uu dharka u qalajiyo. Hubi sida uu qallajiyahaagu u shaqeeyo.

Wax badan badbaadi!

1 Ma sanqar ayaa baxaysa ama jagac-jac ayaa maqlaysaa markaad soconayso?

- Iska ilaali in aad soo qaado ruufarka mar kasta oo uu hoolka gurigu yeesho jaay/ quruurux yaryar ama jajabyada yaryar ee miiska hoostiisa yaala - diyaarso burushka xaaqinka .

2 Wax ur xun leh

- Dhowr daqiiqo hawada u fur. Hawada ayaa beddelmaysa, gurigu ma heleyo wakhti uu ku qaboobo.

3 Isticmaal qabowga

- Saabuunaha casriga ahi si nadiif ah ayey ugu dhaqdaan 40° iyo 60°, yaree inta badan intii suurtoagal ah!
- Isticmaal barnaamijka eco inta ugu badan ee aad awooddo.

4 Dab ku shid tukayaasha?

- Armaajooyinka wax qallajiya ayaa ah kuwo aan waxtar lahayn, tamar-tu kala badh ayey dharka qallajisaa oo keliya, inta soo hartana waa khasaare.

IFTIINKA

Si buuxda!

- Nalalku dhammaantood uma baahna inay si isku mid ah u iftiimaan. Ku dheji nalalka saxda ah meesha saxda ah oo kaydi tamarta.
- Aalad iftiinka lagu xakameeyo (dimmer) kuma heleysid dareen raaxo leh oo keliya ee laakiin badanaa wuxuu sidoo kale kuu badbaadin karaa tamar adiga! Weydii qof khabiir ku ah sida aad guriga ugu samayn karto.

DAAQADAAHA/DARIISHADAAHA

Waxay u liigi karaan sida shaandhada

- Si joogto ah u hubi in aanay wax soo daynayn ama liigayn (lister) oo ay dariishahda dhammaantood si fiican u xidhan yihiin.
- Daahyo gaagaaban iyo shabaqyada dariishadaha lagu xiro (persienner) ayaa kaa caawin kara inaad kulaylka guriga ku haysato qabowguna dibadda kaaga baxo - soo jiid habeebkii.
- Daaqadaha qadiimka ah waxaa lagu dahaadhi karaa "maro sida koorafka loo tolay" "dragkrov".

SI SAX AH GURIGA U QALABEE

hawadu ha wareegto

- Qalabka guriga kulayliyaa (elementet) waa inuu kululeeyaa hawada qolka oo dhan, ma aha kursiga fadhiga ama daaha gadaashooda oo keliya.
- Ku dahaadh/ku aadi gidaarada dibadda armaajooyinka buuggaagta, tv-ga ama marooyinka derbiyada la sudho ee wakhtiyadii hore la isticmaali jiray.
- Ku aadi oo dhig kursiga fadhiga ee gaaban (fåtöljen) derbiga gudaha oo ka tax- addar qabowga soo geleya, ku qurxi buste iyo roogag dabacsan oo qurux leh.

Sidoo kale ka fikir!

1 Si joogto ah u daaran in kastoo uu densan yahay?

- Xitaa nalka densani koronto ayuu isticmaaki karaa. Qalabka kala beddela quwada korontada (transformatorn) ee nalalka halogen-ku waxay isticmaalaan koronto xitaa markay densan yihiin. Ka soo saar filada korontada

2 Qabow iyo dhaxan

- Bustaha kulaylka, joodariga kulaylka, barkimada kulaylka, kulayliyeyasha cagmo gashiga korontadu - haa habab dhammaantood wada fiican ... laakiin waxay isticmaalaan koronto ... markaa xasuusnoow saacad (timer)!

3 Hadda waa kirismas mar kale

- Dhaqano iyo caadooyin, maxay yihiin? Ka fikir in dhammaan nalalka kirismanka marka dambe la soo wada saaro.

4 Hawadu waa bilaash

- Guryo badan oo leh koronto toos ah ayaa loo isticmaala matoorrada soo nuuga hawada kulul. Hubi in hawada diirani ay hesho meel ama boos bannaan oo ay ku faafi karto gurigaaga.



IFTIINKA

Hadda waxa la shidayaa kun nalal oo ciidda kirismaska ah

- Geedaha kirismaska, bahalka dabada loo geliyo shumacyada la shido iyo ilayska xiddigaha la shidaa dheeraad ayey ku noqdaan kharashka korontada wakhtiga kirismaska.
- Isticmaal nalalka LED-ka oo ku xakamee iftiinka saacad (timer) markaa waxaad heli doontaa tamar-badbaadin oo aad u fican xilliga ciida.

TV-ga IYO TV- BOXYADA CIYAARAHA

Faa'iido iyo raaxaysi

- Demi marka aanad fiirsanayn - waxaa jira dad u baahan tv-ga inuu u noqdo wehel, laakiin dad badan wuxuu ku noqdaa tuugga tamarta haddii uu ka daaran yahay qol iska maran.
- Nabadgelyo nabadgelyo heegan (standby) Wax walba si dhab ah u dami marka aan la isticmaalayn; tv-ga, boxyada ciyaaraha ee noocyada kala duwan ah, iwm.

CIYAARAHA KUMBIYUUTARKA IYO NIDAAMKA CODKA

Sababtoo ah

- Run ahaantii dhammaan qalabka elektaroonigga ah miyaad u haahan tahay in aad daarto marka aad daawanayso tv-ga? Tijaabi inaad daarto waxa keliya ee aad u baahan tahay.
- Ha isticmaalin ciyaarta kumbiyuutarka si aad u daawato filim haddii aad taas beddelkeeda ku samayn karto tv-ga caadiga ah. Ciyaaraha kumbiyuutarku waxay isticmaalaan koronto badan.

Wax badan badbaadi!

1 Warbixin kulul

- Haddii aad rabto inaad iska ilaaliso inay qoortu kaa qabowdo markaad tv-ga fiirsanayso - ha dhigin kursiga fadhiga gaaban (fåtöljen) ama kursiga fadhiga ee dheer dariishada agteeda.
- Buste yaala kurisga fadhiga ayaa si fican kuu kululaynaya.

2 Armaajo wax diirisa

- Haddii aad dhigto armaajada buuggaagta meel ku aadan derbiga dibadda xiga, waxay kaa ilaalinaysaa dhax-anta waxoogaa yar!

3 kululayiyaha dhulka ee Smälänsk

- Kabbaha guriga lagu dhex joogo ama sharabaado/iskaal-sooyin culculus ayaa si degdeg ah u diirrinaya nafta qabowday.
- Roogga miiska fadhiga hoostiisa la dhigaa ma aha fikir xun iyaduna!

4 Maalmaha ay cadceeddu jirto

- Fadlan isu dhig si ay fallaadhaha qorraxdu kuu kululeeyaan xilliga jiilaalka. Laakiin fallaadhaha kulul ee qorraxda ee xilliga xagaaga waa in laga ilaaliyaa inay gudaha dariishadaha ka soo galaan. Shiraac ama daah maro ah ayaa ku caawin kara adiga.

ALAABTA LAGU CIYAARO IYO HIWAAYADAHA

Farsamada adduunka

• Qolalka carruurta waxaa inta badan ka buuxa weelka dhala-da ka samaysan ee kalluunka lagu rido (akvarium), gitaarka korontada, waddooyinka baabuurta iyo alaabooyin badan oo lagu ciyaaro oo koronto ku shaqeeya. Haddaynu nahay dadkeena waaweyn innaga ayaa siina carruurta dhamaan qalabka elektarooniga ah sidaa darteed waa in aynu ka caawinnaa si ay u sameeyaan waxa saxda ah!

XARUNTA WAX LAGU JAAJGAREEYO

Way fududahay in si sax ah wax loo sameeyo

• U diyaari meel wanaagsan oo wax lagu jaajgareeyo/lagu buuxiyo. Hal ama in ka badan oo ah godadka korontada oo leh meel furaha korontada laga beddelo ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

TV, KUMBIYUUTAR IYO MAKIINADA WAX DAABACDA OO ADIGA KUU GAAR AH


Meel gees ah oo adiga kuu gaar ah

• Furaha korontada laga beddelo (ström-brytare) oo qalab kasta loogu talagalay ee badhanku uu iftiimiyo haddii aad illowdo inaad demiso, waxay ka caawinaysaa inuu ilmuhu ka taxadaro heeganka joogtada ah (standby).

IFTIINKA

Iftiin ah oo ammaan ah

- Qolka middabada cad lihi wuxuu u baahan yahay iftiin yar!
- Isticmaal nalka LED-ka ah habeenkii.
- Nalalka dhammaantood waa inay fududaato si loo demiyo.



CARRUURTA YAR YARI WAY KARAAN

- Deminta nalalka iyo daminta meelaha furayaasha kotontada laga beddelo.
- Ka demi tv-ga, raadiyaha, kumbuyuutarka, iwm. hal meel oo ah meesha furaha korontada laga beddelo (en strömbrytare)
- Ka soo saar jaarjarada godka korontada derbiga .
- Ka caawi qoyska intiisa kale inay badbaadiyaan tamarta - way ku fiican yihiin inay ku xasuusiyaan sida loo sameeyo!

DHALINYARADU WAY KARAAN

- Fahanka isticmaalka tamarta oo "iskood haysaga bixiyaan", ku xir mitir-ka tamarta cabbira qolka oo si wadajir ah u akhriya usbuuc kasta.
- Inay bartaan kharashka qubayska! Xisaabiya inta ay noqonayso kharashka marka la qobaysto 5 ama 15 daqiiqo
- Waxaa Yurub ku nool 75 milyan oo dhallinyaro ah, haddii ay si wadajir ah wax wanaagsan u wada qabtaan waxay noqon karaan geesiyasha deegaanka taas oo wax ka taraysa adduun wanaagsan.

IFTIINKA

U iftiimi

- Ha u soo laalaadin nalka si aan qorshe lahayn. Ku meelayn sax ah iyo xulashada qalabka/guluubyada nalalka, nooca iftiinka, qulqulka iftiinka iyo xoogiisa, waxaad ka heli doontaa waayo-aragnimo gebi ahaanba kugu cusub oo waxaa kuu tashiilmaya tamarta. Weydiiso caawimo dukaanka dhexdiisa!

KUMBIYUUTARADAIYO ROUTERADA

Had iyo jeer online ah

- Haddii aad had iyo jeer u baahan tahay inaad noqoto online markaad soo jeedo, waxaa laga yaabaa inaad awoodid inaad ka saari karto fillooyinka habeenkii!

JAARJARADA

Nidaam kululayn cusub

- Jaarjarada aan la isticmaalin oo ku jira meesha korontada la geliyo ayaa sii wadaya inay isticmaalaan tamarta. Had iyo jeer ka soo saar fillada korontada.

MAKIINADA WAX LAGU DAABACO


Dhammaan ama wax la'aan

- Haddii aanad waxba soo daabacayn, waxa laga yaabaa in aanad u baahnayn inaad daarto/shido makiinada.

QOLKA

Nalka dadaalka ayaa iftiimaya

- Istimaal ka tamarta ee xafiiska gurigaaga si dhakhso leh ayuu u kordhi karaa waxaana muhiim ah inaad goobtaada shaqo ka dhigto tamar wax ku ool ah.
- Haddii aad doonayso inaad dib u cusboonaysiiso qalabkaaga, iibso farsamooyinka deegaanka u wanaagsan iyo alaabada tamarta madhxisa/dhowrta oo leh heer tamareed oo wanaagsan.



Wax badan badbaadi!

1 Shaashad soo jiidasho leh

- shaashada demiyaha sawirada dhaqaaqa lehi wuxuu kor u qaadaa isticmaalka tamarta
- Shaashada weyni waxay kor u qaadaa isticmaalka
- Istimaal habka badbaadinta tamarta ee leh iftiinka hoose ee isticmaalka korontada yar

2 Xafis wanaagsan

- Shaashaddu waxay isticmaali kartaa kala badh wadarta guud ee isticmaalka tamarta kombuyuutarka, isticmaal qaybta badbaadinta tamarta.
- Waxba ha soo daabacin haddii aan loo baahnayn
- Kumbiyuutar si joogto ah meel u yaalaa wuxuu u baahan yahay tamar ka badan kan laptop-ka
- Jaajgarayso telefoonka si aad had iyo jeer u hesho inta u dhaxaysa 20 iyo 80 boqolkiiba, waxay ka dhigaysaa jaajgarayn gaaban maalintii

3 Nasashada kafeeyga

- Gee/ka dhig kumbuyuutarka meesha nasahada markay noqoto wakhtiga kafeeyga


4 Farsamo naxdin leh

- Ma jeceshahay qalabka elektarooniga! Si taxader leh oo cimiladana u wanaagsan u jeclow oo dhig qalabka markaad u baahan tahay oo keliya.

IFTIINKA

Daar, demi, daar, demi, daar, demi...

- Way fiican tahay had iyo jeer inaad demiso nalka haddii aad qolka ka baxdo in ka badan 30 ilbiriqsi.



ALBAABKA HORE

Diidaya

- Ha soo deynin martida aan la martiqaadin, si degdeg ah albaabka u xir marka qabowgu soo garaaco!

KULAYLIYAHA DHULKA

Irrid cajiib ah

- Kuleyliyaha dhulku wuxuu noqon karaa tuug tamareed, cagahaaguna had iyo jeer ma sheegaan runta - waxay kugu khiyaamayn karaan inaad u aragto inuu qolku qabow yahay. Haddii aad kor u qaado kulaylka dhulka, kulaylka qolkuna sidoo kale kor u kacayaa - laga yaabo in ka badan inta aad u baahan tahay.
- Haddii aad guriga ku kululeyso kuleyliyaha dhulka, wuxuu wax badan kululeynayaa roogagga iyo saraha kabbaha hoostooda
- Demi oo xir marka aan loo baahnayn.



Wax badan badbaadi!

1 Albaab qalloocan/xun

- Haddii albaabka hore uu qalloocan yahay ama uu leeyahay qaab-dhismeedyo xun, si dhakso leh waxaa kuu soo booqan doona dabayshii jiilaalka.

2 Qof kasta waxay faa'iido ugu jirtaa irid wanaagsan

- Ka jooji wasakhda, qabowga iyo qoyaanka albaabka laga soo galo markaa waxaad tamjarta u kaydinaysaa guriga intiisa kale.

3 Barkadda dabaasha ee gudaha kabbaha buudhka

- Kabbaha- iyo qalajiyaha gacmo gashiga ayaa samayn kara mucjiso, laakiin xusuusnow saacad.

4 Iyo geedaha qaar...

- Xayeysiintu waxay joojin kartaa wixii albaabka hoostiisa la dhigay markay ka soo dhacdo meesha waraaqaha laga soo rido ee boosta, laakiin calaamadda "Maya mahadsanid xayeysiis" waxay badbaadinaysaa tamarta iyo dhirta labadaba.

KORONTADA BANNAANKA

korontada waxa lagu dubo, barkadda dabaasha, shucaaca laysku kululeeyo (infravärme), balliga beerta

- Korontadu dhammaanteed waa lacag, xitaa tan aan dibadda ku isticmaalno! Demi, xir, si xikmad leh u isticmaal - way khuseysaa dibadda iyo gudahaba labadaba!
- Ma kulaylin kartaa qorraxdu biyahaaga kulul ama ma ka heli kartaa iftiin?



IFTIINKA

Nalalka dibaddu koronto la mid ah ayey isticmaalaan?

- Waa maxay nalalka dibadda kaaga daarani? Hubi inuu nalku daaran yahay marka loo baahan yahay oo keliya adiga oo la kaashanaya saacad (timers), nalalka dhaqdhaqaaqa ama qalabka otomaatiga ah ee ku shaqeeya iftiinka iyo mugdiga . Ka fikir inay si dhakhso ah iftiin u noqoto xilliga guga!
- Nalal badan oo kala duwan oo tamarta kaydiya ayaa sidoo kale ku shaqeeya dibadda, weydii dukaanka si aad u hesho kuwa saxda ah!

KULAYLIYAHA MATOORKA

Arrin xasaasi ah

- U isticmaal had iyo jeer kuleyliyaha matoorka saacad, oo la soco heerkulka bannaanka.
- Markay tahay $-15\text{ }^{\circ}\text{C} = 1.5\text{ h}$, markay tahay $0\text{ }^{\circ}\text{C} = 1\text{ h}$ iyo markay tahay $+10\text{ }^{\circ}\text{C}$ looma baahna kuleyliyaha matoorka.

Jaranjarada guriga, qolka istoodhka iyo garaashka

JARANJARADA GURIGA


Jiimka guriga

- Socodka degdega ah ee jaranjarada waxaad ka heleysaa jimicsi wanaagsan maalin kasta, iska ilaali wiishka haddii aad awooddo.
- Ha u daarin/shidin nalka sidii hore caadiga kuugu ahaan jirtay, daar/shid markay mugdiga tahay.

QOLKA ISTOODHKA IYO GARAASHKA

Burburin iftiin

- Dabcan, waa inaad leedahay iftiin fican, laakiin demi markaad ka baxdo!
- Ma aha in rinjiga lagu kaydiyo heerkul ka hooseeya eber/maynis, waxaa laga yaabaa inaad boos ka heli karto gudaha halkii aad ka kululayn lahayd qolka istoodhka/garaashka.




Tamarta loogu talagalay aqoonta hunguriga

KU XISAABTAN TAMARTA

Tamarta waxa lagu cabbiraa kWh (kilowatt saacadood, 1. 000 watt oo saacadood) oo maalin kasta waxaad guriga ku isticmaashaa tamar badan ama mid yar.

Isticmaalka tamarta ma aha wax lala yaabo. Waxyaabaha kala duwani waxay u baahan yihiin tamar kala duwan. Haddii qalab ama nalalka badan aad shido/daarto oo ay wakhtiga dheer daaran yihiin, markaas tamar badan ayaad ku khas badan tahay inaad lacagteeda bixiso. Sidan ayaad u xisaabinaysaa tamarta:



Waxtarid

Waxtarida waxaa lagu cabbiraa Watts (W) waxayna qeexaysaa sida ay u awood badan tahay shoolada sare ee wax lagu kariyaa (spis) ama nalku. Tamar badan ayaa loo baahan yahay haddii hal nal uu yahay:

- 60W markaad u barbardhigo 40W

Dooro midka saxda ah = dooro watt yar



Wakhti

Wakhtiga waxaa lagu cabbiraa saacado (h). Waxa loo baahan yahay tamar badan haddii hal nal daaran yahay:

- 24 saacadood maalin kasta - marka loo barbardhigo
- 4 saacadood maalin kasta

Samee waxa saxda ah = dami oo xir

Markaad ogaato saameynta iyo wakhtiga, waxaad si fudud u xisaabinaysaa isticmaalka tamartaada/korontaada, inta kWh ayeey khasab tahay inaad lacagteeda bixiso:



Waxtarid

Wakhti

Tamar

Dadka oo dhan isku mid uma aha

Xagee ayaad adigu deggan tahay: aagga korontada Heshiiskaaga korontada: doorsooma/isbed-bedela ama qiime go'an Kharashyadu waxay noqonayaan: kharashka rukumashada, kharashka shabakadda, cashuurta tamar-ta iyo cashuurta dadban

	Isticmaalka korontada bishii kWh	Kharashka bishii iyadoo ay ku xiran tahay qiimaha korontada			
		0,7 kr/kWh	1 kr/kWh	5 kr/kWh	7 kr/kWh
Jannaayo	2.800	1.960 kr	2.800 kr	14.000 kr	19.600 kr
Febraayo	2.400	1.680 kr	2.400 kr	12.000 kr	16.800 kr
Maarso	2.400	1.680 kr	2.400 kr	12.000 kr	16.800 kr
Abril	2.000	1.400 kr	2.000 kr	10.000 kr	14.000 kr
Maajo	1.200	840 kr	1.200 kr	6.000 kr	8.400 kr
Juun	800	560 kr	800 kr	4.000 kr	5.600 kr
Luuliyo	600	420 kr	600 kr	3.000 kr	4.200 kr
Agosto	600	420 kr	600 kr	3.000 kr	4.200 kr
Sibtembar	1.000	700 kr	1.000 kr	5.000 kr	7.000 kr
Oktoobar	1.600	1.120 kr	1.600 kr	8.000 kr	11.200 kr
Noofambar	2.000	1.400 kr	2.000 kr	10.000 kr	14.000 kr
Diisambar	2.600	1.820 kr	2.600 kr	13.000 kr	18.200 kr

Tusaale ahaan isticmaalka korontada ee guri bangalo ah oo isticmaala tamar dhan 20,000 kWh sannadkii.



Energikontoren
SVERIGE

Haddii aad rabto talo ama taageero, la xidhiidh la taliyaha tamarta- iyo cimilada deegaankaaga. Macluumaadka lagala xiriirayo waxaad ka heli kartaa bogga Energimyndigheten.se Buuggan yar ee qoraalka ah waxa soo saaray Xafiiska tamarta ee dalka Iswiidhan. Fikradda iyo naqshadaynta: Christel Liljegren, Xafiiska tamarta ee Koonfur-bari. Qaab sawireedka iyo tusaalooyinka buugga lagu muujisayey: Mattias Käll